**Amarka Lr. 3 rep.**

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA SOOMAALIYA

MAAMULAHA

MARKA uu arkay Dekereetada Madaxweynaha Talyaaniga ee taariikhda 9 Disember 1952, Lr. 235;

MARKA uu tixgaliyay habboonaanta in la dhiso Wakaalad leh shaqsiyad qaanuuneed oo hadafkeedu yahay gacan siinta horumarka dhaqaalaha ee Dalka si loo siiyo amaah xagga Beeraha iyo xannaanada xoolaha, warshadaha yar-yar, farshaxanka gacanta, ha ahaado dhinaca qalabka iyo horumarinta, sidoo kale ama maaraynta keydinta wax soo saarka Soomaaliya iyo ka qaybgalka hawlo muhiima oo loola jeedo kobcinta dhaqaalaha Soomaaliya;

MARKUU arkay qod. 1 ee Amarka 28 rep. ee soo baxay 23 Disember 1951;

MARKUU arkay qod. 4 ee Bayaanka Mabadii'da Dastuuriga ee ku dhexjira Heshiiska Ilaalinta Dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada Maamulka Talyaaniga;

MARKUU arkay qod 8 ee Heshiiska Ilaalinta dalka Soomaaliya ee soo baxay 9 Disember 1952, Lr. 2357;

Wuxuu amaryaa:

**Qod. 1**

Dhismaha Wakaaladda Amaahda ee Dawladda Soomaaliya oo leh shaqsiyad qaanuuneed oo xarunteeda sharci ay tahay Muqdisho.

**Qod. 2**

Wakaaladda hadafkeedu waa in ay gacan siiso horumarka dhaqaalaha Dalka iyadoo amaah bixinaysa xagga beeraha iyo xannaanada xoolaha, warshadaha yar-yar iyo farshaxanka gacanta, ha ahaadeen wixii ku saabsan dhinaca qalabka iyo kobaca hawlgalladaas, iyo waxa ku saabsan wax soo saarka, ganacsiga iyo dhoofinta wax soo saarka.

Si loo gaaro hadfayadaas, Wakaaladdu waxay ku tallaabsan kartaa, marka laga reebo soo uruurinta keydadka kalsoonida ee cinwaan kasta leh iyo qaab kasta, dhammaan hawlgallada Bangiga ee aan lahayn dabeecad maalgelin.

Shuruudaha iyo qaababka lagu xirayo bixinta amaahda, suurtagalnimada qorshaha iyo fulinta hawgallada idil, waxaa lagu qeexayaa Xeerka Wakaaladda, taaso uu Maamuluhu Soomaaliya uu Dekereeto ku oggolaanayo.

Wakaaladdu waxay maareyn kartaa keydinta iyo meelaynta miraha iyo wax soo saarka kale ee Soomaalida, qaabka loo dejinayo nidaamka Maamulaha Soomaaliya wuxuu ku oggolaanayo dekereeto, iyo in uu socodsiiyo dhismaha bakhaarro lagu keydiyo wax soo saarkaas isaga ah.

Si ay u gaarto hadafyadeeda, Wakaaladdu waxay ku tallaabsan kartaa wax kasta oo ku habboon, oo ay ku jiraan ka qaybgal kasta ee Soomaali ee leh hawlo hadafkaasoo kale leh, iyo in ay qabtaan hawgallo maguurto, kadib marka uu oggolaado Maamulaha Soomaaliya oo midba markiisa la bixinayo.

**Qod. 3**

Hantida Wakaladdu waxay ka koobantahay:

a) deeq lacageed oo dhan Sh.So. 2.000.000 oo ay keentay AFIS;
b) tabaruc lacagta khasaare oo ah Sh.So. 1.200.000 oo AFIS ka soo qaaddo Saamilayda Shirkadda Beerlayda (S.A.C.A.) iyo Shirkadda Beeralayda Jubba (S.A.G.);
c) dheeraadka saafiga, oo cayn ah ama tiro, ee maareynta Adeegga Keydka Badarka, oo si joogta oo lacag-la'aan/bilaash ah, loogu qoondeeyay Wakaaladda;
d) tabarrucaad kale oo uu bixiyo A.F. I.S.;
e) hanti maguurto kale oo si joogto ah A.F.I.S ugu qoondayso, oo lacag -la'aan/bilaash ah, si loogu qabto hawlgaladeeda;
f) hibooyin, la xariira hawlo ballaaran ee nooc kasta iyo meel kasta ka yimaada oo wakaaladdu ay hesho;
g) siyaadada togan ee hawlqabad kasta ee Wakaaladda, wixii ku siman xadka uu u gooyay Xeerka Wakaaladda.

**Qod. 4**

A.F.I.S waxay ka bixin kartaa miisaaniyaddeeda dammaanado la xariira baahi aan caadi ahayn iyo lacago loo siiyo horumaris ahaan.

**Qod. 5**

Wakaaladdu, marka A.F.I.S u oggolaato, waxay samayn kartaa waajibaadyo/xilqaadis nooca sitaha/haystaha ama midka magacaaban iyo in ay la gasho hay'ado iyo wakaalado maaliyadeed ee kale, bangiyo heshiisyo dayn gudaha iyo dibadda, si ay u gaarto hadafkeeda ama hawgallo maaliyadeed oo u gaara oo mug weyn, kuna xiran kobaca dhaqaalaha iyo bulsho ee Dalka.

**Qod. 6**

Dhammaan hawlgallada amaahda ee lagu soo sheegay qod. 2, waa in ay ahadaan kuwo dammaanad leh, sida uu qabo xeerka. Kuwaasu kama badnaan karaan muddo shan sano ah.

Amaahyada lala galay beeraleyda waxay mudnaan ku leeyihiin miraha geedaha ku yaalla. Mudnaantaas waxaa si deg-deg ah u raacaya mudnaanta kharashka garsooridda dhammaan wixii mudnaan gaara ee hore oo uu xeerarka jira nidaaminayaan.

**Qod. 7**

Dekereetada Maamulaha Soomaaliya, iyo soo jeedinta Guddiga Maamulka, ayaa sanad kasta lagu goynayaa nuxurka dulsaarka Wakaaladdu ay ka heshay hawlgallada amaahda iyaga ah. Dulsaaradaas kama badnaan karaan sharciyan dulsaarka canshuur dhaafka rasmiga ee ka jira Soomaaliya.

**Qod. 8**

Hawlgallada amaahda beeraha oo Wakaaladdu ay samayso si waafaqsan faqradda koobaad qodobka 2aad iyo tallaabooyinka idil, heshiisyada, qoraallada iyo qaababka la xariira isla hawlgallada iyo fulintoodaba, sidoo kale iyo hawgallada keydinta miraha, lama saarayo canshuur, tigidhka canshuurta iyo magdhow/kharashka waqtiga la joogo ama soo socda oo uu u sugnaaday A.F.I.S. ama Wakaaladaha maxalliga. Hawlgallada kale ee amaahda ee lagu sameeyay si wafaqsan faqradda koobaad ee qodobka 2, canshuur dhaafiddu waxay ku koobantahay kala bar xuquuqda ku waajibtay. Canshuurta tigidhka (bollo) ee kambiyaalaha ay dammanad qaadeen urur-hantiyeedka, waxa la

saarayaa canshuurta tigidka qaab joogto ah oo ah 0,10 boqlkiiba Sh.So., wax kasta ha ahaado muddada dhicitankooda.

**Qod. 9**

Xubnaha Wakaaladu waxay yihiin:
a) Golaha Maamulka;
b) Guddiga baarayaasha.

**Qod. 10**

Guddiga Maamulku wuxuu ka koobanyahay Guddoomiyaha iyo lix xubnood oo lagu soo magacaabo dekereto Maamulaha Soomaaliya oo muddad xil-hayntoodu ay tahay laba sano. Iyaga xilkaas waa loo cusboonaysiin karaa.

Qaababka uu u shaqaynayo Guddiga Maamulka iyo xilalkooda xeerka Wakaladda ayaa lagu qeexi doonaa.

**Qod. 11**

Guddiga Baarista wuxuu ka koobanyahay saddex xubnood oo joogto ah iyo laba aan joogto ahayn oo lagu soo magacaabo dekereeto Maamulaha Soomaaliya iyago oo xilka haynaya laba sano. Iyaga waa loo cusboonaysiin karaa.
Baare joogto ah oo uu soo magacaabo Hantidhowraha ayaa qabanaya xilka Guddoomiyaha Guddiga baarayaasha.
Guddiga baarayaasha waxay hawlahooda u gudanayaan si waafaqsan xeerarka Dalka ka jira.

**Qod. 12**

Agaasimaha Wakaaladda waxaa lagu soo magacaabayaa dekereto Maamulaha Soomaaliya, marka uu tala ku soo jeediya Guddiga maamulka.

Xilalka Agaasimaha waxaa lagu qeexayaa xeerka Wakaaladda.

**Qod. 13**

Wakaaladda waxaa ilaalinaya A.F.I.S., qaab waafaqsan Amarkaan iyo xeerka Wakaladda.

**Qod. 14**

Dhammaan kulamada Guddiga maamulka waa inuu ku guddoomiyaa cod wada tashi ah, sarkaal ka mida Hoggaaminta Kobaca Dhaqaalaha A.F.I.S. oo si cad loogu soo wakiishay, xitaa marba marka kale, qaraar ka soo baxay Maamulaha Soomaaliya.

Dhammaan go’aamada ay gaaraan Golaha Maamulka waxaa la wargeliyaa Maamulaha Soomaaliya muddo ku siman saddex cisho. Haddii shan cisho ka dib oo ka bilaabata marka Maamulaha go’aanka soo gaaro aan la joojin ama dood laga keenin, go’aankaas wuxuu noqonayaa mid la fulin karo. Wixii intas ka duwan go’aamadu waxay noqonayaan kuwo la fulin karo keliya kadib marka si cad uu u soo oggolaado Maamulaha Soomaaliya.

**Qod. 15**

Kharashka lagu sameyayo lacagta deeqda Sh.Som.2.000.000 ee ku xusan qodobka 3aad, xarafka *a)* waxaa raacaya maareynta kharashka soo hara ee DD. AA. 2 Febraayo 1954, Lr. 5 ee 5 iyo 10 febraayo 1954, Lr. 6 (Kharshka – Liistatada lr.13. Xirmada lr.54, Es.1950/1951).

**Qod. 16**

Maamulaha Soomaaliya, marka uu dhagaysto Guddiga Maamulka, wuxuu ku dhaqaaqi karaa in uu kala diro iyo in uu Wakaaladda geliyo xaq-gudid (liquidazione), waxaana hawshaas qabanaya maamule xaqa-guda oo uu isagu magacaabo, mararka soo socda:

a) markii la xaqiijiyo jiritaanka gefaf culus iyo xadgudubyo xeerarka, nidaamyada ama shuruuc kale oo nidaaminaya maamulka Wakaaladda;
b) marka la xaqiijiyo khaasre isku fuuqsaday, wax dhaafsan lacagta keydka ah ee horay u jirtay, oo ka badan kala barka hantita Wakaaladda;
c) marka la xaqiijiyo u qalmid la'aanta Wakaaladda in ay hadaafkeeda gaarto.

Marka la kala diro Wakaaladda, Maamulaha Soomaaliya, uu dhagaysto Guddiga Maamulka, wuxuu dekereeto ku soo saarayaa in loo weeciyo hantida Wakaaladda ulajeedooyin dan-guud, isagoo jihaynaya lacagta deeqda ee ku xusan qod. 3aad, xarafka a).

**Qod. 17**

Amarkan wuxuu dhaqangalayaa taariikhda lagu qoro Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 22 Feb. 1954.

*MAAMULAHA*
**Martino**